# Tilmaamaha Baahiyaha Kaalmada Bulsho

Loogu Talagalay Xubnaha

Markii u dambeysay ee la cusbooneeyay: Diiseembar 2025

CareOregon®

# Shaxda Tusmada

**Tilmaamaha Baahiyaha Kaalmada Bulsho CareOregon ........ 1**

**Health Related Social Needs (HRSN, Baahiyaha Bulsho ee Caafimaadka La Xiriira) 1**

Taageerada Guriyaynta ee HRSN ........ 1

Agabka Cimilada ee HRSN ........ 4

Taaageerada Nafaqada HRSN ........ 5

**Adeegyada Debecsan ........ 7**

Taageerada Adeegyada Debecsan ee Guriyaynta ........ 7

Agabka Cimilada Adeegyada Debecsan ........ 9

Taageerada Adeegyada Debecsan ee Nafaqada ........ 10

Adeegyada Debecsan ee Taageerada Kale ee Bulsho ........ 11

# Tilmaamaha Baahiyaha Kaalmada Bulsho CareOregon

Baahiyaha bulshada waxaa ka mid ah helitaanka qofku helo cunto ku filan, gaadiid, hoy deggan, waxbarasho, saaxiibo ku garab istaaga, iyo helitaanka biyo iyo koronto. Marka aadan haysan waxyaabahaas oo kugu filan, waxay waxyeello u geysan kartaa jirkaaga iyo maskaxdaada labadaba. Marka aad haysato waxa aad u baahan tahay, waxay kaa caawin kartaa helista caafimaad iyo fayoqab guud. Hagahan waxa loo sameeyay inuu kaa caawiyo fahamka waxa loo baahan yahay si caawimo loo helo.

# Health Related Social Needs (HRSN, Baahiyaha Bulsho ee Caafimaadka La Xiriira)

## Taageerada Guriyaynta ee HRSN

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada guriyaynta HRSN, dhammaan kuwa soo socda waa in la dabbaqo:

- Waa inaad hadda xubin ka tahay
- Waa in aadan adeega/shayga ku heli karin dheef ama qaab kale
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad iyo nololeed oo u dhiganta kuwa hoos ku qoran

### Xaalad caafimaad oo u qalanta

- **Dadka waawayn 65 jirka ah ama ka wayn**
- **Carruurta ka yar 6 jir**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee adag**
- **Dhibaato caafimaad jireed ama ilkeed oo daran**
- Inaad ka timaado dheefaha Medicaid oo keliya oo aad noqoto mid u qalma **dheefaha Medicaid iyo Medicare labadaba**
- Xubnaha la kulmaya **ama la kulmay interpersonal violence (IPV, tacaddiyada xiriir shaqsi).** Kuwan waxa ka mid ah tacaddiyada guriga domestic violence (DV) (tacaddiyada guriga), taacaddiyada galmada sexual violence (SV) (taacaddiyada galmada), ama tacaddiyada kasmanafeed.
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira muddada 12 ka dib dhalmada**
- Xubnaha **qaba naafo korriin ama garaadka ah**
- Xubnaha **u baahan in laga caawiyo mid ama wax ka badan oo hawlaha nolol-maalmeedka ah**
- Xubnaha si joogto ah u adeegsaday **waaxda gargaarka degega ah ama adeegyada qalalaasaha**

### Xaaladaha nolosha ee u qalma

- **Kharashyada kirada/adeegyada guriga, lacagta uruurtay ee korontada iyo biyaha ama la amray in qaab loo baxsho, iyo kharashyada kaydinta:**
    - Xubnaha:
        - Dakhliga qoyskoodu yahay ama ka yar yahay 30% celceliska dakhliga sannadlaha ee halka ay ku nool yihiin EE aan haysan cid ka caawisa in aanay lumin hoyga ay deggan yihiin
        - Ku jira guri kiro ah
        - U baahan in laga caawiyo dhanka kharashka hoyga
        - Haysta heshiis kiro ama is-afgarada kala kiraysasho oo qoran

- **Beddelaada guriga:**
  - Xubnaha:
    - Xabsi ka soo baxay
    - Ka soo baxay xarunta caafimaadka dhimirka ama goobaha lagaga soo kabto maandooriyaha
    - Waqti ku soo qaatay nidaamka daryeelka ilmaha ee Oregon (daryeelka korinta) ee hadda ama muddo hore
    - Ka yimi dheefaha Medicaid oo keliya oo aad noqoto mid u qalma dheefaha Medicaid iyo Medicare labadaba
    - Dakhliga qoyskoodu yahay ama ka yar yahay 30% celceliska dakhliga sannadlaha ee halka ay ku nool yihiin EE aan haysan cid ka caawisa in aanay lumin hoyga ay deggan yihiin
    - Qoran Young Adult with Special Healthcare Needs (YSHCN, Dhalinyarada Qaangaarkaa ee Leh Baahiyaha Caafimaadka Gaarka ah)
- **Degganaansha hudheel/albeerko:**
  - Xubnaha:
    - Dakhliga qoyskoodu yahay ama ka yar yahay 30% celceliska dakhliga sannadlaha ee halka ay ku nool yihiin EE aan haysan cid ka caawisa in aanay lumin hoyga ay deggan yihiin
    - Helaya guri beddelis
    - U baahan goob ay joogaan inta lagu jiro guri beddelista HRSN

## Agabka iyo adeegyada la heli karo

| Agabka iyo adeegyada | Xaddidaadaha | Reebitaanada |
|---|---|---|
| **Kirada** | | |
| Lacagta lagu daboolayo kharashka soo laablaabta ee kirada ama kirada la soo dhaafay ee illaa lix bilood. Tan waxa ku jira:<br>• Bixinta lacagta kirada<br>• Caymiska kirada, haddii heshiska kiradu waajibinayo<br>• Adeegyada guriga ee uu baxsho milkiilaha guriga ee aanay horay u dabooli jirin kaalmada adeega guriga | • Adeegyada hal mar la helo<br>• Ku kooban xaddiga hadda la leeyahay, oo ay ku jiraan wixii kiro hartay ah<br>• Magaca xubinta codsanaya waa inuu ku qornaado heshiiska kirada<br>• Xubintu waa inay si toos ah u qoran tahay Oregon Health Plan (OHP, Qorshaha Caafimaadka Oregon) xilliga kaalmada la bixinayo | • Kharashyada xayawaanada rabbaayadda ah (oo ay ku jiraan taageerada shucuureed ee xayawaanka)<br>• Kharashyada baakinka<br>• Kharashyada dheeriga ah ee guriga soo raaca<br>• Canshuuraha milkiilaha gurigu bixiyo<br>• Caymiska guriga<br>• Lacagta kirada la siiyo asxaabta qolka ama xubnaha kale ee qorshaha caafimaadka |

| Agabka iyo adeegyada | Xaddidaadaha | Reebitaanada |
|---|---|---|
| **Adeegyada guriga** | | |
| Lacagaha lagu daboolo kharashyada soo xidhista, dib u xidhista ama kuwa uruuray ee adeegyada guriga ee ay ka midka yihiin:<br>• Qashinka<br>• Biyaha<br>• Bullaacadda<br>• Dib u warshadaynta<br>• Gaasta<br>• Korontada<br>• Interneetka<br>• Taleefan | • Illaa lix bilood oo kaalmada kharashka adeegyada guriga ah oo loogu talagalay kharashka muddo dhaafay ama mustaqbalka la rabo<br>• Xubnuhu waa inay helayaan kaalmada HRSN ee bixinta lacagta kirada | • Biilasha adeegyada guriga ee aan ku qornayn magaca xubinta. Xubintu waa inay keento caddayn muujinaysa in cinwaanka adeega helaya uu yahay cinwaankooda<br>• Kharashyada adeegyada guriga ee dadka guriga iska leh |
| **Hudheelada/Albeerkooyinka** | | |
| Lacago lagu daboolayo kharashyada deganaanta hudheel ama albeerko. | Xubnuhu waxay u qalmaan inay taageerada helaan haddii aanay joogi karayn guryahooda muddada guri beddelista HRSN ansixisay | • Kharashyada xayawaanada rabbaayadda ah<br>• Kharashyada baakinka<br>• Kharashyada dheeriga ah ee guriga soo raaca |
| **Beddelaada guriga** | | |
| Beddelista hoyga xubin caymiska ka tirsan si looga ilaaliyo khataro caafimaad iyo badbaado. Sidoo kale, hubinta in gurigoodu buuxinayo baahiyahooda caafimaadka, badqabka, iyo hawlahooda maalinlaha ah.<br>Waxa ku jira kuwan soo socda:<br>• Jaranjarooyin<br>• Biraha la cuskado ee hareeraraha<br>• Gacanahada albaabada iyo armaajooyinka<br>• Dabargoynta cayayaanka<br>• Nadaafadda qotada dheer<br>• Rakibista daahah la dhaqi karo ama daaqado xannibayayaal sameys ah oo lagu caawinayo dadka xasaasiyadda leh | • Sidii loo baahnaa uga dhici kara goobta qofku deggan yahay | • Isbeddelada guriga ee xallintoodu saaran tahay milkiilaha<br>• Isbeddelada guriga ee loo sameeyo naqshad ama qaab dartood<br>• Isbeddelada lagu kordhinayo cabbirka guriga<br>• Dayactirka iyo qaabaynta guud ee loogu talagalay guriga |

| Agabka iyo adeegyada | Xaddidaadaha | Reebitaanada |
|---|---|---|
| **Kharashyada kaydinta alaabada** | | |
| Lacagta lagu baxsho kaydinta aaminka ah ee alaabada qofka si loo caawiyo rarista ama xilliga qofku hoyga beddelanayo. | • Kharashka kaydinta ee hadda oo illaa lix bilood ah<br>• Xubnuhu waa inay helayaan dheefta HRSN ee bixinta lacagta kirada<br>• Adeegyada hal mar la helo | • Kharashka kaydinta ee loogu talagalay qaybaha kaydinta aan ganacsiga ahayn |

## Agabka Cimilada ee HRSN

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada agabka cimilada HRSN, dhammaan kuwa soo socda waa in la dabbaqo:

- Waa inaad hadda xubin ka tahay
- Waa in aadan adeega/shayga ku heli karin dheef ama qaab kale
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad <u>iyo</u> nololeed oo u dhiganta kuwa hoos ku qoran

### Xaalad caafimaad oo u qalanta

- **Dadka waawayn 65 jirka ah ama ka wayn**
- **Carruurta ka yar 6 jir**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee gaarka ah**
- **Dhibaato caafimaad jireed ama ilkeed oo gaar ah**
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira muddada 12 ka dib dhalmada**
- Xubnaha **qaba naafo dhanka garaadka ama korriinka ah** oo dhacdo cimilo kordhisio baahida caafimaad ee xaaladdan
- Xubnaha **u baahan in laga caawiyo mid ama wax ka badan oo hawlaha nolol-maalmeedka ah** ee dhacdo cimilo kordhiso baahida caafimaad
- Xubnaha si joogto ah u adeegsaday **waaxda gargaarka degega ah ama adeegyada qalalaasaha** sababo la xiriira dhibaato caafimaad oo cimilo ku tacaluqda

### Xaaladaha nolosha ee u qalma

- **Wajahay hoy la'aan**
- Ka soo baxaya **xabsi**
- Ka soo baxaya **xarunta caafimaadka dhimirka** ama goobaha lagaga soo kabto maandooriyaha
- Ku jira nidaamka daryeelka ilmaha ee Oregon (**daryeelka korinta**) ee hadda ama muddo hore
- Inaad ka timaado dheefaha Medicaid oo keliya oo aad noqoto mid u qalma **dheefaha Medicaid iyo Medicare labadaba**
- In dakhliga qoyskaagu yahay ama ka yar yahay **30% celceliska** dakhliga sannadlaha ee halka aad ku nooshahay OO aanad haysan cid ka caawisa in aadan lumin hoyga aad deggan tahay
- Qoran **Dhalinyarada Qaangaarka ah ee Leh Baahiyaha Caafimaadka Gaarka ah** (YSHCN)

## Alaabada la heli karo

| Shayga | Xaddidaadaha |
|---|---|
| **Mukeef** | • Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| **Qalabka hawada lagu sifeeyo** | • Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| **Kuleeliye** | • Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| **Firinjiyeer yar** | • Ku kooban daawooyinka ama cuntada dareeraha ee u baahan in talaaagad lagu hayo<br>• Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| **Dab kaydiye la qaadi karo** | • Ku kooban in loo adeegsado qalabka caafimaadka ama agabka u baahan dab koronto ee lagama maarmaanka u ah xiriirada activities of daily living (ADL, hawlaha maalinlaha ah)<br>• Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |

# Taaageerada Nafaqada HRSN

## U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada nafaqada HRSN, dhammaan kuwa soo socda waa in la dabbaqo:

- Waa inaad hadda xubin ka tahay
- Waa in aadan adeega/shayga ku heli karin dheef ama qaab kale
- Aad ku sugan tahay hubanti la'aan cunto
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad iyo nololeed oo u dhiganta kuwa hoos ku qoran

## Xaalad caafimaad oo u qalanta

- **Cuntooyinka caafimaad ahaan u qiyaasan:**
  - Xubnaha qaba xaalado caafimaad oo u baahan cuntooyin khaas ah
- **Waxbarashada cuntada iyo nafaqada:**
  - **Dadka waawayn 65 jirka ah ama ka wayn**
  - **Carruurta ka yar 6 jir**
  - **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee adag**
  - **Dhibaato caafimaad jireed ama ilkeed oo daran**
  - Xubnaha u wareegaya xaaladda **Medicaid iyo Medicare** ee wada jira
  - Xubnaha la kulmaya **ama la kulmay tacaddiyada xiriir shaqsi (IPV), ay ku jiraan tacaddiyada guriga (DV)**, tacaddiyada galmada (SV), ama tacaddiyada dhinaca kaas-manafeedka.
  - Xubnaha **uurka leh ama ku jira muddada 12 ka dib dhalmada**
  - Xubnaha **qaba naafo korriin ama garaadka ah**
  - Xubnaha **u baahan in laga caawiyo mid ama wax ka badan oo hawlaha nolol-maalmeedka ah**
  - Xubnaha si joogto ah u adeegsaday **waaxda gargaarka degega ah ama adeegyada qalalaasaha**

## Xaaladaha nolosha ee u qalma

- **Wajahay hoy la'aan**
- Ka soo baxaya **xabsi**
- Ka soo baxaya **xarunta caafimaadka dhimirka** ama goobaha lagaga soo kabto maandooriyaha
- Ku jira nidaamka daryeelka ilmaha ee Oregon (**daryeelka korinta**) ee hadda ama muddo hore
- Ka imanaya dheefaha Medicaid oo keliya oo noqonaya mid u qalma **dheefaha Medicaid iyo Medicare**
- In dakhliga qoyskaagu yahay ama ka yar yahay **30% celceliska** dakhliga sannadlaha ee halka aad ku nooshahay OO aanad haysan cid ka caawisa in aadan lumin hoyga aad deggan tahay
- Qoran **Dhalinyarada Qaangaarka ah ee Leh Baahiyaha Caafimaadka Gaarka ah** (YSHCN)

## Adeegyada la heli karo

| Adeegyada | Xaddidaadaha |
|---|---|
| **Qiimeynta cuntooyinka caafimaad ahaan u qiyaasan:**<br>La kulmista dhaqtar cunto yaqaan ah oo fiirin kara caafimaadka xubinta si uu fiiriyo inay u baahan yihiin cuntooyin khaas u ah xaaladooda. | |
| **Cuntooyinka caafimaad ahaan loo qiyaasay**<br>Cuntooyinka si khaas ah loo waafajiyay xaalada(ha) caafimaad ee xubinta. | • Cuntooyinka waa in la geeyo guriga xubinta ama meeshii kale ee ay xubintu ku nooshahay. Goobahaas waxa ka mid ah hoy-yada aan bixin cuntooyinka<br>• Xubintu waxay heli kartaa saddex cunto maalintii muddo illaa lix bilood ah<br>• Haddii xubintu ku nooshahay goob laga rabo inay cunto bixiyaan, adeega ma heli karto<br>• Xubintu waa inay haysato goob ay si aamin ah ugu kaydsato cuntada oo ku diyaarsato |
| **Waxbarashada nafaqada iyo cuntada**<br>Waxbarasho kasta oo xubinta ka caawinaysa xulashada cunto caafimaad qabta iyo daryeelista jirkooda. | • Adeegan lama isticmaali karo haddii xubintu adeeg midkan la mid ah ku heli karto dheef caymis caafimaad |

# Adeegyada Debecsan

Adeegyada Debecsan waa alaabooyin ama adeegyo qiimo ahaan habboon oo la siiyo xubnaha si loogu kaabo dheefaha caymiskoodu u daboolay. Waa waxyaabaha horumarin kara caafimaadka xubinta laakiin aan ka qayb ahayn qorshahooda caymiska caafimaadka. Tusaaleyaasha waxa ka mid ah qaar ka mid ah qaybaha soo socda.
Xubnaha Oregon Health Plan (Medicaid) ee qoran CareOregon waxay heli karaan illaa $1,500 oo Adeegyo Debecsan ah sannadkiiba.

## Taageerada Adeegyada Debecsan ee Guriyaynta

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada Adeegyada Debecsan ee guriyaynta, dhammaan kuwa soo socda waa in la dabbaqo:

- Waa inaad hadda xubin ka tahay
- Waa in aadan adeega/shayga ku heli karin dheef ama qaab kale
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad sida kuwa hoos ku xusan

### Xaalad caafimaad oo u qalanta

- **Dadka waawayn 65 jirka ah ama ka wayn**
- **Carruurta ka yar 6 jir**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee adag**
- **Dhibaato caafimaad jireed ama ilkeed oo daran**
- Xubnaha u wareegaya xaaladda **Medicaid iyo Medicare** ee wada jira
- Xubnaha la kulmaya **ama la kulmay tacaddiyada xiriir shaqsi (IPV), ay ku jiraan tacaddiyada guriga (DV)**, tacaddiyada galmada (SV), ama tacaddiyada dhinaca kaas-manafeedka.
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira muddada 12 ka dib dhalmada**
- Xubnaha **qaba naafo korriin ama garaadka ah**
- Xubnaha **u baahan in laga caawiyo mid ama wax ka badan oo hawlaha nolol-maalmeedka ah**
- Xubnaha si joogto ah u adeegsaday **waaxda gargaarka degega ah ama adeegyada qalalaasaha**

### Agabka iyo adeegyada la heli karo

| Agabka iyo adeegyada | Xaddidaadaha | Reebitaanada |
|---|---|---|
| **Kirada** | | |
| Lacagta lagu daboolayo kharashka soo laablaabta ee kirada ama kirada la soo dhaafay ee illaa saddex bilood.<br>Tan waxa ku jira:<br>• Bixinta lacagta kirada<br>• Caymiska kirada, haddii heshiska kiradu waajibinayo<br>• Adeegyada guriga ee uu baxsho milkiilaha guriga ee aanay horay u dabooli jirin kaalmada adeega guriga | • Diyaar ah halmar saddexdii sanoba mar<br>• Ku kooban xaddiga hadda la leeyahay, oo ay ku jiraan wixii kiro hartay ah<br>• Magaca xubinta codsanaya waa inuu ku qornaado heshiiska kirada<br>• Xubintu waa inay si toos ah u qoran tahay OHP xilliga caawimada la bixinayo | • Kharashyada xayawaanada rabbaayadda ah (oo ay ku jiraan taageerada shucuureed ee xayawaanka)<br>• Kharashyada baakinka |

| Agabka iyo adeegyada | Xaddidaadaha | Reebitaanada |
|---|---|---|
| | • Xubintu waa inay muujiso inay kirada mustaqbalka iska bixin karayso | • Kharashyada dheeriga ah ee guriga soo raaca<br>• Canshuuraha milkiilaha gurigu bixiyo<br>• Caymiska guriga<br>• Lacagta kirada la siiyo asxaabta qolka ama xubnaha kale ee qorshaha caafimaadka |
| **Adeegyada guriga** | | |
| Lacagaha lagu daboolo kharashyada soo xidhista, dib u xidhista ama kuwa uruuray ee adeegyada guriga:<br>• Qashinka<br>• Biyaha<br>• Bullaacadda<br>• Dib u warshadaynta<br>• Gaasta<br>• Korontada<br>• Interneetka<br>• Taleefan | • Illaa lix bilood oo caawimo ah oo loogu talagalay in lagu baxsho adeegyada guriga ee muddo dhaafay ama la iska rabo mustaqbalka<br>• Diyaar ah halmar saddexdii sanoba mar<br>• Xubintu waa inay muujiso inay lacagta adeegyada guriga ee mustaqbalka iska bixin karayso | • Biilasha adeegyada guriga ee aan ku qornayn magaca xubinta. Xubintu waa inay keento caddayn muujinaysa in cinwaanka adeega helaya uu yahay cinwaanka xubinta.<br>• Kharashyada adeegyada guriga ee dadka guriga iska leh |
| **Hudheelada/Albeerkooyinka** | | |
| Lacago lagu daboolayo kharashyada deganaanta hudheel ama albeerko. | Xubnuhu waxay xaq u leeyihiin inay helaan taageero xaaladahan soo socda:<br>• Markay isbitaalka ka baxaan ee aanay haysan meel ay ku noolaadaan<br>• Xaalad cimilo oo daran oo uga sii daraysa xaaladda caafimaad ee xubinta<br>• Ku helista guri cusub muddo saddex bilood ah ka dib marka xubintu horay guri la'aan u ahayd<br>• In xubintu aanay awoodin inay guriga sii joogto muddada guriga laga beddelayo | • Kharashyada xayawaanada rabbaayadda ah<br>• Kharashyada baakinka<br>• Kharashyada dheeriga ah ee guriga soo raaca |

| Agabka iyo adeegyada | Xaddidaadaha | Reebitaanada |
|---|---|---|
| **Beddelaada guriga** | | |
| Beddelista hoyga xubin caymiska ka tirsan si looga ilaaliyo khataro caafimaad iyo kuwo badbaado. Hubinta in gurigoodu buuxinayo baahiyahooda caafimaadka, badqabka, iyo hawlahooda maalinlaha ah.<br>Waxa ku jira adeegyadan soo socda:<br>• Jaranjarooyin<br>• Biraha la cuskado ee hareeraraha<br>• Gacanahada albaabada iyo armaajooyinka<br>• Dabargoynta cayayaanka<br>• Nadaafadda qotada dheer<br>• Rakibista daahah la dhaqi karo ama daaqado xannibayayaal sameys ah oo lagu caawinayo dadka xasaasiyadda leh | • Sidii loo baahnaa uga dhici kara barta qofku deggan yahay<br>• Codsiga waa inay la socoto qiyaasta qiimaha isbeddelka loo baahan yahay oo faahfaahsan | • Isbeddelada guriga ee xallintoodu saaran tahay milkiilaha<br>• Isbeddelada guriga ee loo sameeyo naqshad ama qaab dartood<br>• Isbeddelada lagu kordhinayo cabbirka guriga<br>• Dayactirka iyo qaabaynta guud ee loogu talagalay guriga |
| **Kharashyada kaydinta alaabada** | | |
| Bixinta lacagta kaydinta alaabada shaqsiga ah si qofka loo caawiyo xilliga guuritaanka ama waqtiga isbeddelka, si alaabada xubinta si aamin ah loogu kaydiyo looguna raro. | • Kharashka kaydinta ee hadda oo illaa lix bilood ah saddexdii sannadoodba mar | • Kharashka kaydinta ee loogu talagalay qaybaha kaydinta aan ganacsiga ahayn |
| **Kharashaadka guuritaanka** | | |
| Kaalmo ka geysashada u diyaargarawga guuritaanka | • Diyaar ah halmar guuritaankii kastaba | • Lagama oggola guuritaanka gobolka ka baxsan |

## Agabka Cimilada Adeegyada Debecsan

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada qalabka cimilada Adeegyada Debecsan, dhammaan kuwa soo socda waa in la dabbaqo:

- Waa inaad hadda xubin ka tahay
- Waa in aadan adeega/shayga ku heli karin dheef ama qaab kale
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad sida kuwa hoos ku xusan

### Xaalad caafimaad oo u qalanta

- **Dadka waawayn 65 jirka ah ama ka wayn**
- **Carruurta ka yar 6 jir**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee gaarka ah**
- **Dhibaato caafimaad jireed ama ilkeed oo gaar ah**
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira muddada 12 ka dib dhalmada**

- Xubnaha **qaba naafo dhanka garaadka ama korriinka ah** oo dhacdo cimilo kordhisio baahida caafimaad ee xaaladdan
- Xubnaha **u baahan in laga caawiyo mid ama wax ka badan oo hawlaha nolol-maalmeedka ah** ee dhacdo cimilo kordhiso baahida caafimaad
- Xubnaha si joogto ah u adeegsaday **waaxda gargaarka degega ah ama adeegyada qalalaasaha** sababo la xiriira dhibaato caafimaad oo cimilo ku tacaluqda

### Alaabada la heli karo

| Shayga | Xaddidaadaha |
|---|---|
| **Mukeef** | • Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| **Qalabka hawada lagu sifeeyo** | • Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| **Kuleeliye** | • Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| **Firinjiyeer yar** | • Ku kooban daawooyinka ama cuntada dareeraha ee u baahan in talaaagad lagu hayo<br>• Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |
| **Dab kaydiye la qaadi karo** | • Ku kooban in loo adeegsado qalabka caafimaadka ama agabka u baahan dab koronto ee lagama maarmaanka u ah xiriirada ama hawlaha kale ee nolosha maalinlaha ah (ADL)<br>• Hal aalad oo beddel ah saddexdii sannadoodba mar |

## Taageerada Adeegyada Debecsan ee Nafaqada

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerada Adeegyada Debecsan ee nafaqada, dhammaan kuwa soo socda waa in la dabbaqo:

- Waa inaad hadda xubin ka tahay
- Waa in aadan adeega/shayga ku heli karin dheef ama qaab kale
- Aad ku sugan tahay hubanti la'aan cunto
- Waa inaad hadda qabto xaalad caafimaad iyo nololeed oo u dhiganta kuwa hoos ku qoran

### Xaalad caafimaad oo u qalanta

- **Dadka waawayn 65 jirka ah ama ka wayn**
- **Carruurta ka yar 6 jir**
- **Dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka ee adag**
- **Dhibaato caafimaad jireed ama ilkeed oo daran**
- Xubnaha u wareegaya xaaladda **Medicaid iyo Medicare** ee wada jira
- Xubnaha la kulmaya **ama la kulmay tacaddiyada xiriir shaqsi (IPV), ay ku jiraan tacaddiyada guriga (DV)**, tacaddiyada galmada (SV), ama tacaddiyada dhinaca kaas-manafeedka.
- Xubnaha **uurka leh ama ku jira muddada 12 ka dib dhalmada**
- Xubnaha **qaba naafo korriin ama garaadka ah**
- Xubnaha **u baahan in laga caawiyo mid ama wax ka badan oo hawlaha nolol-maalmeedka ah**
- Xubnaha si joogto ah u adeegsaday **waaxda gargaarka degega ah ama adeegyada qalalaasaha**

### Adeegyada la heli karo

| Adeegyada | Xaddidaadaha |
|---|---|
| **Sanduuqyada cuntada**<br>Cuntooyin khaas ah oo laga helo beeraha iyo kooxaha kale ee maxalliga ah | • Keliya dhibaatada caafimaad jireed ama ilkeed oo daran |
| **Waxbarashada nafaqada iyo cuntada**<br>Waxbarasho kasta oo xubinta ka caawinaysa xulashada cunto caafimaad qabta iyo daryeelista jirkooda. | |

## Adeegyada Debecsan ee Taageerada Kale ee Bulsho

Xasuusin ahaan, Adeegyada Debecsan waa alaabooyin ama adeegyo qiimo ahaan habboon oo la siiyo xubnaha si loogu kaabo dheefaha caymiskoodu u daboolay. Waa waxyaabaha horumarin kara caafimaadka xubinta laakiin aan ka qayb ahayn qorshahooda caymiska caafimaadka. Xubnaha Oregon Health Plan (Medicaid) ee qoran CareOregon waxay heli karaan illaa $1,500 oo Adeegyo Debecsan ah sannadkiiba.

### U-qalmitaanka

Si aad ugu qalanto taageerooyinka kale ee bulsho, dhammaan kuwa soo socda waa in la dabbaqo:

- Waa inaad hadda xubin ka tahay
- Waa in aadan adeega/shayga ku heli karin dheef ama qaab kale
- Shayga ama adeegu waa inuu caawinayo xaaladaada caafimaad

### Agabka iyo adeegyada la heli karo

Kuwani waa tusaaleyaasha taageerada baahiyaha bulsho ee badanaa la arko. Liiskan kuma dhamma wax kasta oo aanu kaa caawin karno. Haddii uu jiro wax aad ugu baahan tahay caafimaadkaaga dartiis oo aan liiskan ku jirin, na waydii anaga ayaana tixgelin doona codsigaaga. Xaaladaha maalgelintu way kala duwanaan doonaan waxayna ku xirnaan doonaa shayga ama adeega aad codsanayso.

| Agabka iyo adeegyada | Xaalad caafimaad iyo nololeed oo u qalanta |
|---|---|
| **Agabka taageera dareemaha**<br>(bustayaal miisaaman, agabka caawiya hurdada, lacagaha fasalada yoogada, iwm.) | • Xubnaha la tacaalaya xaaladda ootisimka, walwalka ama niyadjabka |
| **Dayactirada gaariga** | • Xubnaha deggan ee ku nool baabuurtooda ee u baahan in dayactir fudud loogu sameeyo gaariga |
| **Dharka** | • Xubnaha ka baxsanaya tacaddi dhinaca guriga ka haysta |
| **Qalabka sabiyada**<br>(kursiga gaariga ama xanjeerka) | • Xubnaha uurka leh ama dhowaan umulay |
| **Agabka elegtarooniga ah sida aaladaha lagu xiriiro ama taableedyada** | • Carruurta la tacaalaya xaaladda ootisimka, walwalka, niyadjabka |

| Agabka iyo adeegyada | Xaalad caafimaad iyo nololeed oo u qalanta |
|---|---|
| **Agabka waxbarshada ama buugaagta** | • Xaaladaha caafimaadka jirka ee daran |
| **Agabka jimicsiga iyo xubinimada jiimka** | • Xaaladaha caafimaadka jirka ee daran |
| **Iska diiwaangelinta kaam** | • Carruuta qabta ootisimka ama niyadjabka, iwm. |
| **Agabka nadaafada afka (burushka cadayga)** | • Xubnaha leh yoolal daawayneed oo lagaga hortagayo cilladaha caafimaadka afka/ilkaha |

## Reebitaanada

Taageerooyinkan iyo adeegyadan soo socda hadda LAMA daboolo:

- Codsiyada dib u bixinta agabka iyo adeegyada aan la daboolin
- Agabka iyo adeegyada lagu bixiyo dheefaha caymiskaaga caafimaadka.
- Biilasha kaarka daynta ama lacagaha daynta lagu baxsho
- Bixinta lacagaha daynta guriga
- Khidmadaha (khidmadaha xayawaanada rabbaayadda ah, khidmadaha sharci, iwm.)
- Bixinta lacagaha daryeelbixiyayaasha ama taageeroyinka kale ee la soo shaqaaleysto ee muddada dheer
- Lacagaha loogu talagalay dadka aan xubnaha ahayn, sida maalgelinta adeegyada korontada ee qof aan xubin ahayn ama u helista mukeef qof aan ku noolayn gurigaaga
- Bixinta lacag la xiriirta dhisidda qaabdhismeed ama shay cusub
- Waxyaabaha cuntada kaaba ee guud
- Gadashada buugaagta
- Gadashada guri ama gaari
- Bixinta lacagaha baabuurta ama dayactir wayn oo gaari loo sameynayo
- Iibasashada waxyaabaha guriga lagu qurxiyo
- U bixista fasax ama safar kale
- Agabka guriga aan lagu daboolin dheefta agabka cimilada
- Alaabo ama adeegyo kasta oo aan dheefahooda xaqiijisnayn
- Adeegyada caafimaadka ilkaha ee u baxsho adeeg bixiye caafimaad ilkeed (qaybta sare ee iliga, ilko gelin, iwm.)

## Xogtan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, iyadoo far waawayn ku qoran, ku qoran farta indhoolayaasha ama u taalla qaabka aad rabto. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjumaan. Caawimadani waa bilaash. Wac 800-224-4840 ama TTY 711. Waanu aqbalnaa wicitaanada xiriirinta ah.

## Waxa ku caawin kara turjumaan daryeel caafimaad oo aqoon leh shahaadona haysta.

OHP-25-6430

OHP-251090900-MEMBERS-SM-1223